

Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa

Sarakiciiddii



Waxa qoray: Edward Hughes
Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Waxa dhaqan-geliyay: Lyn Doerksen
Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia
Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

BFC
PO Box 3
Winnipeg, MB R3C 2G1
Canada


©2013 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Gabadh ayaa taagnayd meel
taag ah dusheed, indheheeda
murugadu ka muuqataana
waxa ay daawanayeen
muuqaal aad u xun.
Waxa dhimanayay
wiilkeedii.
Hooyadani waxa
ay ahayd Maryan,
waxaanay taagneyd
meel u dhow halkii
Ciise loogu
qodbayay
iskutallaabta
korkeeda.





Sidee waxyaalahan oo dhammi u dhaceen? Sidee Ciise noloshiisaas quruxda badnaydi uugu dhammaan kartaa sidan foosha xun? Sidee Ilaah wiilkiisa uugu ogolaan karaa in iskutallaabta korkeeda lagu qodbo oo halkaas uugu dhinto? Ciise ma waxa uu qalad ku sameeyay cidda uu ahaa? Ilaah miyuu guul-darraystay?







Maya! Ilaah muu
guul-darraysan. Ciise
muu samaynin wax qalad
ah. Ciise marwalba
wuxuu ogaa in isaga ay
dili doonaan dad xumaan
falayaal ahi. Xitaa
markii Ciise uu ahaa
inan yar, ni da' weyn oo
la yidhaahdo Simecon
ayaa Maryan u sheegay
murugadaas iman
doonta.




Maalmo
yar ka hor
intii Ciise aan
la dilin, waxa
timid haweenay
oo caghiisa ku
shubtay cadar iyo
udug. Xertii dabeeto
waxay yidhaahdeen,
"Naagtani way is
khasaarinaysaa," oo iyada
way canaananayeen. Ciise markaa
wuxuu yidhi, "Naagtani waxa ay
samaysay shaqo wanaagsan, waxay sidan u
samaysay aasitaankayga." Waa ereyo cajiib leh!



Intaas dabadeed, Yuudas oo ka mid ahaa labo iyo tobankii xerta Ciise ahaa, waxa uu waafaqay inuu Ciise wadaadka sare uugu gacan geliyo qadaadiic 30 ah aawadood.





Xilligii Iidda Kormarista, Ciise waxa uu xertiisa la wadaagay cuntadii ugu danbaysay. Wuxuu iyaga u sheegay waxyaalo cajiib leh oo ku saabsan Ilaah iyo ballanqaadyadiisa uu siiyay kuwa isaga jecel. Dabeeto, Ciise wuxuu iyaga siiyay kibis iyo koob ay wadaagaan. Tani waxa ay ahayd inay iyaga xasuusiso in Ciise jidhkiisa iyo dhiiggiisa loo bixiyay cafiska denbiyada awgood.



Ciise dabadeedna wuxuu xertiisa u sheegay in isaga la gacan gelin doono, oo iyaguna ay baxsan doonaan. Butros wuxuu ku adkaystay oo yidhi, "Anigu ma baxsan doono." Ciise wuxuu isaga ku yidhi, "Inta aan diiggu ciyin ka hor, waxaad I inkiri doontaa saddex jeer."






Wakhti danbe oo habeenkaas ah, Ciise wuxuu tegay Beertii Getsamane. Xertiisii isaga la socotayna way hurdeen. Ciise wuxuu ku ducaystay, "Aabbow, koobkan iga fogee, hase ahaatee, doonistaydu yaanay noqon, taaduse ha noqoto."



Si kedis ah waxa beertii kusoo galay col uu horkacayo Yuudas. Ciise ismuu difaacin, laakiin Butros ayaa nin dhegta ka jaray. Ciise dabeeto aayar ayuu taabtay ninka dhegtiisii oo wuu bogsiiyay isaga. Ciise waxa uu ogsoonaa xidhitaankiisu inuu yahay qayb ka mida doonista Ilaah.



Dadkii badnaa waxa ay Ciise u kexeeyeen gurigii wadaadka ugu sarreeya. Halkaasna culimadii diinta


Yuhuuddu waxa ay ku sheegeen inay waajib tahay inuu Ciise dhinto. Butros waxa uu markaas ka daawanayay meel u dhow dabka addoomada.



Halkaasna saddex jeer ayaa dadku ay ku arkeen Butros oo ay ku yidhaahdeen, "Waxa aad la socotay Ciise!" Butrosna saddex jeer ayuu arrintaas inkiray, waxayna noqotay sidii Ciise hore u sii sheegay. Butros xitaa wuu habaartamay oo wuu dhaartay.




QUQU-QUUQUUQ




Waxyar dabadeed, waxa ciyay diiggii. Taasi waxa ay Butros uuga dhignayd sida codkii Ilaah oo isaga xasuusinaya erayadii Ciise. Butros dabeetana si aada ayuu u ooyay.






Yuudas sidoo kale wuu ka xumaaday arrintaas. Wuxuu ogsoonaa in Ciise aanu denbiile ahayn. Yuudas wuxuu 30 qadaadiicda ahaa dib uugu celiyay wadaaddadii, laakiinse waa ay ka diideen inay qaataan.





Yuudas wuxuu
daadiyay lacagtii,
dabeeto wuu
baxay oo wuu
is dilay.






Wadaaddadii waxay Ciise
hor keeneen Bilaatos, oo ahaa
taliyihii Roomaanka. Bilaatos
wuxuu yidhi, "Ninkan wax denbi
ah kumaan helin."
Laakiin dadkii
badnaa waxa ay
ku qayliyeen,

"Iskutallaabta ku qodob!
Iskutallaabta ku qodob!"




Ugu danbayntii Bilaatos wuu aqbalay, waxaanu xukumay in Ciise ku dhinto iskutallaabta korkeeda. Askartii waa ay dharbaaxeen Ciise, oo wejigay ka candhuufeeyeen, waxaanay la dhaceen jeedal. Waxa ay sameeyeen taash qodxaan laga sameeyay oo madaxa u geliyeen kuna cadaadiyeen madaxiisa. Dabeetana waxa ay ku musbaareen iskutallaab ka samaysan loox si uu ugu dhinto halkaas.



Ciise marwalba wuxuu ogsoonaa inuu sidaas u dhiman doono. Sidoo kale wuxuu ogsoonaa in dhimashadiisu ay cafis u keeni doonto denbiilayaasha isaga isku

halleeya. Waxa hareeraha ka xigay oo lala qodbay denbiilayaal. Midkood waxa uu rumaystay Ciise, waxaanu tegay jannada. Kii kale se laakiin muu rumaysanin.



Saacado markuu silcayay
kadib, Ciise wuxuu yidhi,
"Waa dhammaatay,"
waanu dhintay.
Shaqadiisii waa la
dhammaystiray.

Waxaana isaga
lagu aasay xabaal
gaar ah.




Askarkii Roomaanku
intaas dabeed waxa
ay shaabbadeeyeen
dhagaxii oo
xabaashiina ilaalo
ayay u direen.
Imika cidina ma
gali karto cidina
kama bixi karto.



Haddii tani ay ahaan lahayd
dhammaadka sheekada,
murugo intee le'eg
ayay yeelan lahayd.
Laakiinse Ilaah waxa
uu sameeyay wax
cajiib leh. Ciise
dhimashada
kumuu sii jirin!



Salaaddii hore ee subaxnimadii
maalinta ugu horreysay
toddobaadka, kuwo
ka mida xertii Ciise
ayaa arkay iyadoo
xabaasha laga
qaaday dhagaxii
ku daboolnaa.




Markii ay gudaha xabaasha
eegenna, Ciise maydkiisu
muu oollin meesha.



Haweenay ayaa sii joogtay iyadoo xabaasha ka dul ooyaysa. Ciise ayaa dabeetana iyada u muuqday! Waxa ay dib uugu carartay xertii kale si ay uugu sheegto warka farxadda leh. "CIISE UU NOOLYAHAY! CIISE WUU KA

SARAKACAY
DHIMASHADA!"





Si dhakhso ah Ciise wuxuu uugu yimid xertii,
waxaanu tusay nabarradii gacmihiisa
musmaarrada lagaga qodbay. Waxa ay ahayd
run. **CIISE WAA UU SOO NOOLAADAY!**
Wuxuu Butros ka cafiyay inkiritaankiisii uu isaga
ku dafiray, waxaanu xertiisa u sheegay inay
qofkasta u sheegaan waxyaalaha isaga ku
saabsan. Dabeetana wuxuu dib uugu laabtay
samada oo ahayd meeshii uu hore uuga yimid
Iiddii Masiixiga ee uugu horreysay.



Sarakiciiddii


Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Matayos 26-28, Luukos 22-24,
Yooxanaa 13-21

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130





Dhammaad



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

